FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Somalia

# Hubinta Cuntada iyo Nafaqada

## Warbixinta Kooba ee August 2005

Waxa la soo saaray
August 10, 2005

## Tilmaamaha: Qiimaynta Xiliga Guga 2005 kadib ee FSAU

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Arrimaha Gobolka ee Soo shaacbaxaya

Bilihii June/July FSAU oo la kaashanaysa FEWSNET iyo hay'ado kale waxay gabagabaysay qiimaynteeda Guga 2005 kadib ee hubinta cuntada, nafaqada iyo hab-nololeedka ee dhammaan Soomaalia. Warbixinta kooban ee bishani waxay tilmaan ka bixinaysaa natiijooyinka muhiimka ah. Warbixin buuxda oo farsamada ah waxa la soo saari doonaa dhammaadka bishan August. Qiimayntani waxay tafatiraysaa FSAU falanqayntii Deyrta 2004/05 kadib ee la so bandhigay bishii February 2005 (eeg Warbixinta farsamada ee taxanaha ah Lambar IV. 3). Labtaatan hay'adood oo Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa ka tirsan, ururro caalami ah iyo kuwo dalka ah oo aan dawli ahayn iyo maamulka Soomaalida ayaa ka qaybqaatay howlaha qiimaynta ee gudaha laga sameeyey, natiijooyinka hordhaca ahna waxa xifaalayntooda kala qaybgalay FSAU daneeyeyaasha kulamo lagu qabtay gobollada Soomaaliya iyo Soomaalilaand iyo kulamo lagula yeeshay hay'adaha la isbahaysto ee gudaha iyo kuwa caalamiga ah Nairobi.

**NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH**

**Qiyaastii 919,000 oo qof ayaa u baahan gargaar degdeg ah Soomaaliya, 197,000 ka mid ahi waxay ku jiraan xaalad Gurmad Bina-aadamnimo ah, 343,000 waxay ku jiraan Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun, 377,000 kalena waa dad barakacay** (Sanduuqa 1). Gobollada Waqooyiga iyo kuwa Dhexe, waxay heleen roobab aad u fiican Guga 2005 iyo Deyrtii 2004/05 labadaba. Taasoo xaqiijinaysa inay dhammaatay abaartii saddexda sannadood socotay keenaysana dib u soo kabasho hab-nololeedka xoola-dhaqatada ah. Waxa se jira dib u dhac weyn oo ku yimi dib u soo kabashada marka la eego sida uu aadka ugu xumaa gurmadkii hore u jiray. Sidaas darteed goobahaasi waxay ku jiraan xaalad ah **Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun** . Qiyaastii 254,000 oo qof ayaa u baahan taageero hab-nololeedka ah oo degdeg ah. Waxa kaloo jira dad lagu qiyaasay 28,000 oo xaalufay welina ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo**. Koonfurta waxa ka jirta **Gurmad Bina-aadaminimno oo Halis ah**. Xaaladda gobollada Jubba iyo Gedo way sii xumaatay oo ilaa 169,000 oo qof ayaa ku jira **Gurmad Bina-aadminimo** 91,000 qofna waxay yihiin **Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun** (Khariidadda 1 & Sanduuqa 1).

**WARARKA UGU MUHIIMSAN GOBOLLADA**

- **Waqooyiga,** roobab aad u fiican oo Guga 2005 da'ay oo ka dambeeyey roobabkii caadiga ka sarreeyey ee Deyrtii 2004/05 waxay xaqiijinaysaa inay dhammaatay abaartii ka jirtay gobolladaas in ka badan 3 sannadood. Waxana ay keenaysaa dib u soo kabasho hab-nololeedka xoola-dhaqatada ah. Guud ahaan goobahaas waxa hoos looga soo dhigay Gurmad Bina-aadamnimo, walise waxay ku jiraan **Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun** taasoo ay keentay dib u dhaca ku yimi dib u soo kabashada hab-nololeedka marka la eego tirada xoolaha oo yaraatay, deynta badan ee dadka lagu leeyahay iyo heerka waxyeelada loo gaysto deegaanku (Khariidadda 1). Qiyaastii 254,000 oo qof ayaa ku jira Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun oo u baahan taageero hab-nololeedka ah oo degdeg ah. Waxa intaas dheer 28,000 oo qof oo xaalufay oo weli ku jira xaalad ah **Gurmad Bina-aadamnimo** una baahan gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah iyo taageero hab-nololeedka ah (Sanduuqa 1). Qoysaska xaalufay waxay ku eegyihiin magaalooyinka iyo tuulooyinka goboladaas waxana weli haysa nafaqa-darro aad u xun.
- **Gobollada Dhexe**, xoola-dhaqatadu waxay ka faa'iidaysanayaan roobab sida caadiga ah ka badan oo da'ay Guga 2005, oo ka dambeeyey roobabkii fiicnaa ee Deyrtii 2004/5. Guud ahaan, goobahaasi xaaladdoodu hoos ayay uga soo degtay sidii hore ee ahayd Gurmad Bina-aadamnimo, laakiin weli waxay ku jiraan **Xiisad Hab-nololeedka ah oo halis ah** (Khariidadda 1). Celceliska heerarka deyntu hoos ayuu uga dhacay sidii hore, xaaladda seeruhu hore ayay u martay, tirada xooluhuna tartiib ayay u kordhaysaa inkasta oo heerarka nafaqa-darrada loo arko inay weli ka sarrayaan sida caadiga u ah gobolladaas. Hase yeeshee, colaad iyo xiisad sii socota oo ka jirta waqooyiga Galgaduud iyo Koonfurta Mudug waxay ku waddaa inay qasayso suuqyada iyo guuritaanka xoola-dhaqatada. Qiyaastii 57,000 qof oo jooga Galgaduud iyo koonfurta Mudug ayaa u baahan taageero hab-nololeedka ah (Sanduuqa 1). Nabad la'aantu waxay dib u sii dhigi kartaa dib u soo kabashada hab-nololeedka.
- **Koonfurta,** goobo markii hore ahaa Gurmad Bina-aadamnimo oo ah waqooyiga Gedo iyo Jubbooyinku waxay weli ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo oo Halis ah** xaaladduna way sii xumaatay taniyo

**Sanduuqa 1: Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cunta ee Guga ka Diba: Qiyaasta Dadweynaha**

| Gobol | Dadweynaha Gobolka 2004 | Xiisad Hab-nololeedka ah[1] | Gurmad Bina-aadamnimo (Heerka 2)[1] | Isku-darka guud ee dadka baahan oo ah % Isku-darka guud ee Dadweynaha[1] |
|---|---|---|---|---|
| **Waqooyi** | | | | |
| ***Bari*** | **235,975** | **38,000** | **8,000** | 19 |
| ***Nugaal*** | **99,635** | **16,000** | **3,000** | 19 |
| ***Sanaag*** | **190,455** | **45,000** | **9,000** | 28 |
| ***Sool*** | **194,660** | **40,000** | **8,000** | 25 |
| ***Togdheer*** | **302,155** | **36,000** | **0** | 12 |
| ***Xeebaha*** | | **22,000** | | |
| **Isku-darka** | ***1,022,880*** | ***197,000*** | ***28,000*** | *22* |
| **Dhexe** | | | | |
| ***Galgaduud*** | **319,735** | **38,000** | **0** | 12 |
| ***Mudug*** | **199,895** | **19,000** | **0** | 10 |
| **Isku-darka** | ***519,630*** | ***57,000*** | ***0*** | *11* |
| **Koonfur** | | | | |
| ***Bakool*** | **225,450** | **12,000** | **0** | 4 |
| ***Gedo*** | **375,280** | **59,000** | **53,000** | 30 |
| ***Jubbada Hoose*** | **329,240** | **6,000** | **37,000** | 13 |
| ***Jubbada Dhexe*** | **244,275** | **14,000** | **79,000** | 38 |
| **Isku-darka** | ***1,174,245*** | ***91,000*** | ***169,000*** | *22* |
| | | | | |
| **Isku-darka guud** | **2,716,755** | **345,000** | **197,000** | *20* |
| **Tirada la qiimeeyey ee u baahan gargaar** | | **542,000** | | *7* [2] |
| **Qiyaasta tirada dadka barakacay** | | **377,000** [3] | | 5 [2] |
| **Isku-darka guud ee tirada dadka u baahan gargaar** | | **919,000** [4] | | *13* [2] |

**Footnotes**: 1 Tirada qiyaasta ah waxa lagu koobay kunka ugu dhow; 2 Boqolkiiba qiyaasta isku-darka guud ee dadweynaha Soomaalyia; 7,309,266 WHO 2004; 3 Soosaaraha: UN-OCHA warbixintii la tafa-tiray April 2004; 4 Tiradan kuma jiraan saboolka ama maxaysatada magaalooyinku.


Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka: +254 20 374 5734
Faakiska: +254 20 374 5098
Email:fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

Qiimaynta Guga Kadib

qiimayntii xiliga ee u dambaysay (khariidadda 1). Gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah ayaa loogu baahanyahay qiyaastii 53,000 oo qof oo jooga Gedo iyo 116,000 oo jooga Jubba (Sanduuqa 1). Xaaladda Gedo waxa sii xumeeyey roobabkii Guga 2005 oo caadi ka hoosyeeyey, suuqyada iyo ganacsiga oo sii qasmay iyo xiisadda oo kordhay kadib markii ay u qaxeen dad ka barakacay Ceel Waaq. Xaaladda Jubbooyinku way sii xumaanaysaa daadkii dhibaatada u gaystay bilihii May/June, badi dalaggii Guga 2005 oo lagu guul-darraystay iyo qiimaha dalagga oo aad u kordhay dartood. Goobta colaadda oo ah degmada Raab-Dhuure (Khariidadda 1) way ka sii xumaanaysaa sidii hore oo ahayd Feejignaan waxana ay noqonaysaa **Xiisad Hab-nololeedka ah oo aad u xun** oo ay u sabab tahay nabad la'aanta sii korodhay oo keenaysa xaaladda nafaqada oo sii xumaanaysa iyo barakac.

**Dhammaan Koonfurta Soomaalyia** waxa lagu tilmaamay **Xaalad ah Feejignaan** xiisadda sii kordhaysa iyo shakiga ku hareeraysan kala qaybsanaanta siyaasiga ah ee ka dhex jira Dawladda Ku Meelgaadhka ah ee Federaaliga ah (TFG) dartood. Haddi uu dagaal balaadhani dhaco si xun ayuu u saamayn doonaa nolosha iyo hab-nololeedka bina-aadamka. Waxa kale oo jira **Gobollo Feejignaan ku jira ah** oo ay ka mid yihiin goobaha soohdimaha la leh gobollada ay colaadu saamayso ee Ceel Waaq iyo Raab-Dhuure (degmooyinka Garbahaaray iyo Waajid iyo qaybo ah degmooyinka Luuq, Xudur, Baydhaba iyo Ceel Barde). Goobahaas ay colaaddu 'ku fidi kartaa' waxay halis ugu jiraan xiisad bulsho oo sii kordha, suuqyada iyo shaqaalaha oo qasma iyo dad barakacay oo u qaxa. Gobollada Fiijignaanta ku jira waxa ka mid ah Shebeellooyinka iyo dhulka xoola-iyo-beero-dhaqatada ah oo dalaggu uu caadi ka hooseeyey labadii xilli ee u dambeeyey.

**Khariidadda 1: Guga 2005 Kadib Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada**




## TILMAAMAHA QAYBAHA

### CIMILADA
Roobabka Guga 2005 aad ayay dib ugu dhaceen ugana hooseeyeen caadi badi koonfurta. Hase yeeshee, Gobollada Dhexe iyo Gobollada Waqooyiga guud ahaan roobabka Gugu wakhtigoodii ayay si fiican ugu da'een marka laga reebo koonfurta-galbeed ee Togdheer.

### BEERAHA
Soosaarka dalagga Guga 2005 ee Koonfurtu waa kii ugu hosseyey muddo 10 sannadood ah (waa 44% celceliska Dagaalkii Kadib qiyaastiina waa 73,000 MT). Afar gobol soosaarka dalagu wuu ka hoosyey 10% Celceliska Dagaalkii Kadib (Hiran 3%, Jubbada Dhexe 4%, Gedo 7%, Jubbada Hoose 10%), 3 gobol oo kalena wuxuu u dhexeeyey 30-50% celceliska Dagaalka Kadib (Bay 31%, Bakool 36%, Shabeelada Hoose 51%). Koonfurta, Shabeelada Dhexe waa gobolka qudha ee soosaarkiisa dalagu ka sarreeyo caadi (116% cecliska Dagaalkii Kadib) gobolkaas oo ka faa'iidaystay heerka sare ee biyaha iyo waraabinta fatahaadda webiga. Tirada dalaga gobollada Waqooyi-galbeed waxay muujinayaan in soosaaka dalagga ee *K*arantu uu ka sarrayn doono caadi (190% Celceliska Dagaalkii Kadib waxa la filayaa inuu go'o billowga November).

### XOOLAHA
Gobollada Waqooyiga iyo kuwa Dhexe, xaaladda biyaha iyo daaqu way fiicantahay badi goobaha, xaaladda jidhka xooluhu way fiicantahay guuritaankuna waa sida caadiga u ah xiligan. Adhigu way dhalayaan heerka dhalmada xoolaha ee goobaha lagu tilmaamay inay ka jirto Xiisad Hab-nololeedka ah ee Waqooyigu caadi way ka sarraysaa (40-60% ). Dhalmada geela waxa la filayaa Deyrta 2005. Koonfurta, xaaladda biyaha iyo daaqa guudahaan waa caadi gaarahaan Bay, Bakool iyo goobaha webiyada Shabeelle. Laakiin culays ayaa saaran Jubba, Gedo iyo goobaha xoola-iyo-beero-dhaqatada ee Shabeelle.

### SUUQYADA
Shilinka Soomaaliya iyo ka Soomalilaand waxay ku wadaan inaanay isbedelin 6dii bilood ee la soo dhaafay (Sarrifka Doolarka ee Shilinka Soomaalilaand wuxuu ahaa 6,100, ka Soomaaliyana wuxuu ahaa 15,000). Qiimaha bariiska dibedda laga keeno ee gobollada Waqooyiga iyo kuwa Dhexe ismuu bedelin Guga 2005. Qiimaha galayda ee Shabeelooyinka iyo Jubbooyinku aad bay u kordheen taniyo April 2005. Qiimaha hadhuudhku ee goobaha hadhuudhku uu ka baxaa waxay bilaabeen inay kordhaan roobabka Guga 2005 ee aan fiicnayn dartood.

### NAFAQADA
Heerarka nafaqa-darradu weli aad ayay uga sarreeyaan heerka caalamiga ah badi gobollada. Qaybo badan oo ah Bay, Bakool iyo gobollada Dhexe iyo waliba qoysaska xaalufay ama barakacay, nafaqa-darradu aad ayay uga sarraysaa sida caadi ahaan lagu arko. Heerarka nafaqa-darradu aad ayay u sii xumaadeen Waqooyiga Gedo iyo qaybo ah Jubbooyinka.

*Falanqaynta tafatiran ee Guga kadib waxa lagu soo saari doonaa Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAU dhammaadka August 2005*

**Technical & Managerial Support** **Funding Agencies** **Technical Partners**